

# 10 SABABOOD

## OO DEGMADA 196 AY U QABANEYSO AFTIDA SARE UQAADIDA MAALGELINTA



10

### DIB-U-EEGISTA AYAA MUUJINEYSA BAAHIYAHA

Guddi degmo ayaa dib-u-eegis ku sameeyey tashiilaadka iyo agabka, waxa ayna soo saareen qorshe wax looga qabanayo baahiyaha hadda jira iyo kuwa mustaqbalka ee saddexda qeybood ee waaweyn: badbaadada & amniga, goob wax lagu barto, iyo bixinta khibrad joogto ah oo ka jirta degmada oo dhan.

9

### JOOGTEYN TA HEERARKA BADBAADADA IYO AMNIGA

Nidaamka kaamiradaha amniga degmada iyo nidaamyada digniinta dabka qaarkood ayaa sii jiritaankoodu dhammaad yahay, meelaha baakinka gawaarida ma lahan iftiin ku filan, waxaana dugsi kasta looga baahan yahay maalgashi joogta ah si loo ilaaliyo heerarka badbaadada iyo amniga.

8

### DUGSIYADA OO BUUX DHAAFAY

Saddex meelood meel kamid ah dugsiyada Degmada 196 iyo xarumaha waxbarashada (12 kamid ah 35) ayaa leh diiwaangelin kabadan inta uu qaado dhismaha, taasoo keentay wadooyinka hoolalka iyo fasallada inay buux dhaafaan, iyo maqaayado la'aan iyo goob jimicsi la'aan.

7

### 1,000 ARDAY OO DHEERAAD AH OO SOO SOCDA

Diiwaangelinta Degmada 196 waxaa la saadaalinayaa inay ku kororto illaa 1,000 arday marka la gaaro 2030 oo haddana ma jiro boos u bannaan iyaga.



6

### KORORKA WAXBARASHADA GAARKA AH EE XARUNTA KU-SALEYSAN

Barnaamijyadani waxa ay wax u qabtaan arday qabta baahiyo aad u waaweyn waxa ayna ubaahan yihiin boos dheeraad ah ardaygiiba. Diiwaangelinta barnaamijyada xarunta ku-saleysan ee Degmada 196 ayaa kordhay in kabadan 50% 10-kii sano ee la soo dhaafay.

5

### XARUMAHA OO GABOOBAYA

Dugsiyada Degmada 196 celcelis ahaan waxa ay dhisan yihiin 35 sano. Dugsigi ugu dambeeyey, Dugsiga Hoose ee East Lake, waxaa la furay 2017. Dugsiga ugu faca weyn, Rosemount Middle, waxaa la furay 1953 waxaana loo dhisan inuu ku xiro dhismaha dugsi hore ee 1918 oo wali la adeegsanayo.

4

### WAAYA ARAGNIMADA ARDAYGA OO AANAN LA JAANQAADAYNIN

Dugsiyada waxaa loo nakhshadeeyey oo loo qalabeeyey si ka duwan iyada oo lagu saleynayey marki la dhisanayey. Tusaale ahaan, dugsiyada qaarkood ma lahan booska ku filan ee sayniska iyo tijaabooyinka ee ubaahan in lagu sameeyo fasallada caadiga ah dhexdooda ee aanan lahayn tuubooyinka beeshimada leh ama miisaska ku habboon sheybaarka.

3

### TAAGEERIDDA FALSFADEENA SADDEXDA-A

Habkan canuga oo dhan ah wuxuu diiradda saaraa sidii ardayda fursado looga siin lahaa tacliinta, farshaxanka iyo ciyaaraha fudud, wuxuuna ku dhiirigeliyaa ardayda inay ka qeybqaataan waxqabadyada dugsiyada kadib la sameeyo sababta oo ah waxa ay xiriir adag la leeyihiin guusha dugsiyada.

2

### NATIJOOYINKA SAHANKA IYO TALADA DADWEYNAHA

76% ee dadka ka ra'yi dhiibtay sahanka deyrta lasoo dhaafay waxa ay taageereen horumarada lasoo jeediyey si ay u daboolaan baahiyaha xarumaha iyo agabka ee degmada. Su'aal cod bixin loo qaadayo oo labaad oo kusaabsan xarumaha waxqabadka ayaa lagu daray iyada oo lagu saleynayo talada laga helay kulamada iyo onlaynka.

1

### WAA MID DOOKHEENA AH

Canshuur bixiyeyaasha maxalliga ah ayaa mas'uul ka ah maalgelinta dhismaha dugsiyada cusub iyo horumarada lagu sameynayo xarunta, iyada oo loo marayo doorashooyinka aftida sare u qaadida maalgelinta oo cod bixiyeyaasha siineysa kala doorashada. Xog ogaal noqo oo goorhore codkaaga ku dhiibo warqadda codbixinta ee uu ku codeeyo qofka maqan ama Maalinta Doorashada Talaado, Bisha May 9, 2023.

# DHISIDA MUSTAQBALKEENA

## MAALGASHIGA DUGSIYADA IYO BULSHADA

Aftida Maalgelinta 'Bond' May 9, 2023

### MAXAA KU QORAN WARQADDA CODBIXINTA?

#### Su'aasha 1 Horumarada

- Horumarada Badbaadada iyo Amniga ee dugsi kasta
- Dugsi hoose oo cusub si uu u yareeyo culeyska buuxdhaafka ardayda kororna u keeno
- Dugsi Dhexe ee Rosemount oo Cusub oo laga dhiso goob kale si uu u bixiyo waaya aragnimo dheeraad ah oo joogta ah kororna u keeno
- Dib ujeedo u yeelidda Dugsiga Dhexe ee Rosemount ee jiray
- Dhul u iibinta dugsiga dhexe iyo adeegsiga mustaqbalka
- Dayactirka dhammeystiran ee Dugsiga Sare ee Rosemount lagu bilaabay sare u qaadida maalgelinta ee 2015
- Sheybaaro saynis oo dheeraad ah iyo dayactiridda sheybaarada si loo gaarsiiyo heerka degmada
- Ku darista Dugsiga Dhexe ee Scott Highlands oo loogu talagalay buuxdhaafka iyo kororka
- Ku darista Dugsiga Dakota Ridge oo loogu talagalay buuxdhaafka iyo kororka
- Horumarinada goobta waxqabadka ee dugsiyada sare qaarkood
- Beddelka alaabta dugsiga si loo helo jawi waxbarasho oo dabacsan

#### Su'aasha 2 Horumarada

- Ku darista goob xarun waxqabad dugsi sare kasta oo dhammeystiran
- (Apple Valley, Eagan, Eastview iyo Rosemount)

### KHARASHKA & SAAMAYNTA CANSHUURTA



**Hourmarada waxa loo qorsheeyey in wax lagaga qabto baahiyaha labo-su'aalood oo doorasho afti loogu qaadayo sare u qaadida maalgelinta:**

**Su'aasha 1** horumaradu waxay ku kici doonaan kharash lagu qiyaasay \$374 milyan, saameyn canshuur oo dhan \$11.50 bishiiba celceliska qiimaha guryaha Degmada 196 (\$400,000).

**Su'aasha 2** horumaradu waxay ku kici doonaan \$119 milyan oo dheeraad ah, saameyn canshuur oo lagu qiyaasay \$7 bishiiba celceliska qiimaha guriga.

*Su'aasha 2 waxa kaliya ay gudbi kartaa haddii Su'aasha 1 ay gudubto.*

### MACLUUMAADKA COD BIXINTA

- Codeynta qofka maqan oo qof ahaan loo tagayo iyo boostaba ayaa bilaabaneysa Maarso 24
- Codeynta qof ahaan loo tagayo ee hore (ee Xafiiska Degmada) ayaa la helayaa bisha May 2-8
- Codeynta waxa ay furan tahay laga bilaabo saacada 7 a.m. ilaa 8 p.m. ee Maalinta Doorashada Talaado, Bisha May 9, 2023.

### SU'AALAHADA BADANAA LA IS WEYDIIYO

**Su'aal: Maxaa dhacaya haddii su'aalaha sare u qaadida maalgelinta aanan la ansixin?**

Jawaab: Buuxdhaafka iyo waaya aragnimada aanan is-waafaqsaneyn ayaa sii soconaya, ma jireyso goob loogu talagalay koboca, baahiyaha badbaadada iyo amniga waa ay sii jirayaan. Waxaa jiraya wareeg kale oo wadahal bulsho ah oo ku saabsan sida wax looga qabanayo baahiyahaan oo noqonaya soo jeedin dib-u-eegis lagu sameeyey.

**Su'aal: Waa maxay xarun waxqabad?**

Jawaab: Goob weyn, oo leh xarumo/fadhiyo badan oo badanaa lagu gaaf wareejiyey dariiqa socodka oo sare u qaadan, oo leh saqafyo sare si loogu taageero waxqabadyada kala duwan, oo ay kujiraan fasallada barashada jirdhiska inta lagu guda jiro maalinta dugsiga, waxqabadyada iyo naadiyada manhajka kabaxsan ee dugsiga kadib ah, oo ayna isticmaalaan kooxaha bulshada.

### MACLUUMAAD DHEERAAD AH

☎ 651-423-7776

✉ bondinformation@district196.org

# DISTRICT196.ORG/BOND

Waxaa diyaariyey oo lacagta bixiyey Dugsiyada Madaxa Banaan ee Degmada 196 (Dugsiyada Dadweynaha ee Rosemount-Apple Valley-Eagan), 3455 153rd St. W., Rosemount, MN 55068. Daabacaadan laguma baahin magac musharax ama su'aal codbixineed.

